Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.7-aad **04/05/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa 7-aad Saac.fur.12:05gh.Saac.Xir.2:05gd.
Guntinta(Quorum) 181Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Kawada hadlida soo jeedinta Xukuumadda Federaalka oo u abaaran Nidaamka Geedisocodka Doorashada Qaranka 2016.**

1.Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS, Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari) Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari),waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.
2.kadib,Guddoomiyaha wuxuu sheegay kalfadhiga 8-aad kul.7-aad ay maanta taariikhdeedu tahay 3dii bisha Maajo 2016-ka oo ay goob joogyihiin 181 Xildhibaan uu furanyahay.Mudanayaal Ajendaha manta idiin horyaal ay ka koobantahay hal qodobkawada hadaalka soo jeedinta xukuumadda oo ku abaaran nadaamka geedi socodka ,Ajendaha ma laysku raacsanyahay? Xildhinaanadu waxay ku jawaabeyn haa. Mudanayaal maanta waxaan ku ballansaneyn in uu ra'iisul wasaaraha yimaado Golaha yimaado si su'aalo aad u weydiisaan hase yeeshee ,waxaa iila soo xiriirey xildhibaano qaarkood oo soo jeediyey oo ay yiraahdeyn dib nooga dhig Ra'iisul Wasaaraha marka anaga waxaan rabnaa in aan kawada hadalno soo jeedinta uu golaha horkeenay, arrintaas ayaa la rabaa inaad ansaxisaan.

Kadib, wuxuu soo jeediyey in xoghaynta ay soo qoraan xildhibaanadda doonaya in ay ka hadlaan xoghayntuna soo gudbiyeen,kadin Guddoomiyaha wuxuu sheegay in xildhibaanada isasoo qorey ay tiradooda yihii 65 Xildhibaan.wuxuu soo jeediyey in magacyada xoghaynta akhriso si loo ogaado xildhibaanaadda is qorey,wuxuu intaa ku darey in maadaama ay xildhibaanadda ay badanyihiin soo jeedintooda ay noqoto 3-daqiiqo .

3.Xildh. Axmed Aadan Axmed,wuxuu sheegay aragtadiisa ku aadan qoraalka horyaalo waqtiga harey iyo shaqada sugeyso eek u aadan qoraalkaan iyo qaabka doorashada aysan lahayn waqti cayiman oo ku

qoran qaabkii iyo shuruucdii iyo waqtiyadii la raaci lahaa sidey wax u dhici lahaayeen dalka xaaladiisa intaa wixii ka danbeeyo wuxuu ku suganyahay iyo maqaamka uu ku sii socdo aan la garaneyn .sidaan ay tahay haddii baarlamanka la dhexdhigo waxay iila tahay .wuxuu soo jeediyey in dib loo eego qararkaan dad sharciyaqaanoo oo baarlamanka ku jiro loo saaro muddo 7ama 5 beri key noqotoba ay ku dul shaqeeyaan waxa ay ka soo saaraan oo sharciga waafaqsan iyo waxa sharciga waafaqsaneyn uu ku hirgelikaro iyo qaabka uu ku dhicikaro la sharciyeeyo hindise sharciyeed ama qaab sharciyeeysan la soo dhigo Baalamanka la horkeeno ,Baarlamanka kadib doodiisa ka bilaabato iyo ansaxintiisi.Intaa wixii ka danbeeyo shuruucdii dalka u yaaley iyo qaab procetureka la marsiin lahaa la marsiiyo iyadoo loo eegayo waqti harey iyo shaqada taalo ama Ajendaha iyo qoraalka na horyaalo oo aan waqtiyeeysneyn.

Xildh.Cabdi Axmed Dhuxulow,wuxuu sheegay xildhibaano badan ayaa isqorey ha isqoraane waxa laga hadlaayo waxaa loo baahanyahay in uu cad yahay.wuxuu Guddoomiyaha ka codsadey in uu qeexo ,ma waxaa la marayaa sharciyadda meesha ay marijireyn ayaa la marayaa mise tan waa soo jeedin oo la doonsyo in la toostoosiyo taasi qeexideeda waxaa laga sugayaa Guddoomiyaha .

Wuxuu soo jeediyey in laba shey oo muhiim ah in lagu soo dejiyo inta aan dooda la gelin tan koobaad waxay tahay in waqti cad lagu soo dhejiyo waraaqahaan la keenay waqtigee baarlamanka soo idlaanayaa goormaa la dhaarinayaa Madaxda goormaa la dooranayaa Madaxweynaha ugu danbeeyo.waqtigaas oo cad waa in lagu soo kordhejiyaa si loogu kor shaqeeyo. Tan 2-aad waxay tahay 135 odey oo la leeyahay oo awooda la siin rabo in ay wax soo xulaan ,si berito aan laysku qabqabsanin iyagana documentiga halagu soo dhejiyo .labadaas ducumentiska ku cadyihiin odayaasha oo cad wuxuu soo jeediyey in dooda markaas bilaabato .haddii kale meel mugdi ah in la garaaco oo wax kale ka soo baxaan ayey noqondoontaa .

Xildh. Maxamed Ismaaciil Shuuriye,wuxuu sheegay barnaamijka ay xukuumadda noo keentay ma aha barnaaj hadda aan gudagelikarno ,sababtoo tahay waxbadan ayaa dhiman ,waxa hadda Golaha horyaal lwaa 2- qodob oo muhiim ah ,awal waqtiga dalka oo doorashada geli lahaa iyo qaabka loo gelilahaa labadaas qodob kuma cadda qoraalka ay xukuumadda soo gudbisey.sidaa darted, qaabka lagu duwi lahaa Dastuurka Dalka waxa xukuumadda soo gudbisey in ay san wafaqsaneyn 95% Dastuurka Dalka . qaabka ay doorashada u dhici lahayd oo ah lafdhabarka Dalka in la caddeeyo xilligii ay dhici lahayd ,sida uu u sheegay Xildhibaan dhuxulow in lagu celiyo xukuumadda shaxdaas sax ahna la keento.

Xildh.Caasha koos Maxamuud Cumar, waxay sheegtey in ayan qabin dood badan ,haddii la doodo wax aan micno lahayn anagoo baarlamankii dhexjoogna waa dhib ,waxay sakagareysey (Ayidey)Xildhibaan Dhuxulow labadii qodob uu sheegay si looga doodo oo wax looga qabto.

Xildh. Ibraahim Isaaq yarrow,wuxuu sheegay in Ajendaha Golaha horyaala uu cad yahay waxaa na horyaala soo jeedinta xukuumadda hanaanka doorashadda 2016-ka oo madasha ku soo heshiisey hogaanka qaran in Baarlamanka ogolaado oo R/Wasaarahu ka codsadey,waxaan ku ballansaneyn in R/Wasaaraha maanta noo yimaado haddii su'aal noocaan oo kale haddi ay timaado in uu ka jawaabto qabta oo ah goormey doorashada dhaceysaa sharci ayey aheyd waa laga hortagey waxay u egtahay waqti gadasho .wuxuu sheegay in uu wada akhriyey qoraalka la soo gudbiyey wuxuu mulaaxado ku sameeyey waxaa ku jira oo keliya page-ka 9-aad oo shaxda mid ka mid ah waxay leedahay guddiga

heerka Federaal ee doorashada ayaa dib-u-eegis ku sameynaya oo ogolaaneysa dib-u-eegidda inta ay ka kooban yihiin ergooyinka doorashadda September taa oo micnaheedu yahay in qod.60 faqr. 1-aad dastuurka kmg hadda aan ku dhaqmeyno ka soo horjeeda kaas wuxuu leeyahay Baarlamaanka iyo muddada waa 4 sanno oo ka bilaabaneysa maalintii baarlamankaan doorashadiisa lagu dhawaaqey oo aan ognahay in ay aheyd 20 bishii Augost 2012. Waxay ku beegantahay Augostada soo socota 20-keeda ayey ku beegantahay taa waa Dastuuri waana cadahay maalintaas waxaa la rabaa baarlamankaan baarlamaankii bedeli lahaa in uu fariisto oo doorashadiisa lagu dhawaaqo oo Vaccum(meelmaran), meel banana aysan noqonin si aan qarannimada iyo dowladnimadda aan ugu faa'ideysanin cid aan lala xisaabtameyn,sidaasdaraadeed,qodkaas markii laga bixiyo si cad oo dasyuuri ah in baaramankii la rabo in uu soo fariisto oo la soo doortey,xildhibaanadana ay aadaan deganadii ama constituent aan tilmamahaan ku cad qorshaha xukumadda lagu hishiiyay oo loo Hogansamo ee lagu an saxiyo markii laga saray intaas wixii ka danbeya wey u ekaneysaa falaar gigilisho kama godo ee xildhibaano isbadal ayaa loo socdaa inaan nala warerinin jahwareer nala gilinin aanan u ekanin dad radinaya hal igu dar iyo labo igu dar iyo far taagan oo an u ekanin dad diidan in ey kulaabtan in eey dib ugu noqdaan dad kooda oo shabat cidkale kasoo lexatay in manta nalagula dhufanin xildhibanada sharaf uma ahn mana qaadikaraan isbadalkana waan u Hogan sameynaa waxan ogolnahay in aan dadkena ku labano oo dorosho aan radsano taas ayaa lobahanyahay sidaasna aan ku ansaxino.

Xildh. Ahmed ducaale Geele xaaf wuxuu sheegay in beesha caalamka ay qeybqaybisay maamul goboleydyada oo qaab qabiil ku dhisan ,odey dhaqameedkana yaan meel looga dhicin .Xildhibaanadii iiga horeeyey waxay sheegeyn in loo keeno war tifaftiran .wuxuu soo jeediyey in qabiil aan dib loogu noqonin. Tani waxaa laga soo minguuriyey beesha Caalamka ee ma aha wax ay Soomaalidu leedahay.

Xildh. Prof. Maxamed Cumar Dhalxa wuxuu sheegay in mar haddii ay tahayd in documents nusqaan uu yahay in aysan xukuumada la noqoto oo wax cad ah keento ,haddii loo noqonayo 4.5 in ay xukuumadda la noqoto qorshahaan oo dib u soo saxdo.

Xildh. Ciise Wehliye ,wuxuu sheegay dukumindi ka hor imanaayo dasturka in uu guddoonka uu keeno Golaha Baarlamanka ma ahayn . wuxuu soo jeediyey in guddi loo saaro oo ay sharci ka soo sameeyaan qoraalkaan.

Xildh.C/llaahi Goodax Barre.wuxuu sheegay in Dastuurka KMG oo wax laga bedelo ,ama laga doodo wixii Xukuumadda ay soo gudisay ,waxaan ka qabnaa in aan maalin loogu darin xukuumadda jirtaa waxaan soo jeedinayaa in guddi loo saaro oo sharci ka dhigayo 7-bishaan may 2016-ka la soo hordhigo Golaha .

Xildh.Xiis Cowl, wuxuu sheegay in ay ku jiraan 4.5 ,waxay awood ka yihiin 3-da qeybood ama beelood, waxay tabayaan in Golaha uu raali ka yahay .wuxuu Guddoonka ka codsadey in uu qabto wixii ay rabaan .wuxuu soo jeediyey in Guddoonka uu saxo wixii lagu dhalliilayo.

Xildh.Cusmaan Xaaji Cali ,wuxuu sheegay in doorashada ay dhacdo Augost 2016ka taana waa isla **qaadaney ,in 4.5 wax lagu qeybsado taana waan isku raacney ,waa ku qarsoon in ay dib-u-dhacdo xilliga** la rabey in la dhiso xukuumad , Wuxuu ka codsadey Guddoomiyaha in arrinkaa la saxo . Wuxuu

soo **jeediyey** in labo qod. La helo. 1. In ay cadahay xilliga Doorashooyinka .2. In ay waafaqsantahay Dastuurka.

Wuxuu soo jeediyey in guddi la sameeyo oo soo diyaariyo doorashada .

Xildh. Cabdi Samad, wuxuu sheegay in documentigii uu taabanayo Dastuurka .wuxuu soo jeediyey in guddi soo diyaariya ducumenti sax ah la sameeyo kadib u soo gudbiyaan Baarlamanka Federaalka Soomaaliya . wuxuu intaa ku darey kana codsadey Guddoomiyaha Baarlamanka in qaab sharci ah loo soo diyaariyo documentiga la keenay ,kadibna ay golaha ayna ansaxiyaan .

Xildh.Tahliil Cabdi Warsame,wuxuu sheegay in odayaal dhaqameedka ee awooda loo siiiyey in ay soo xulaan Xildhibaanada Cusub ,in ay xukuumadda dhowrto odayaasha.wuxuu soo jeediyey in guddi loo saaro oo soo diyaariyo oo sharci ka dhiga nidaamka qorshahaan.

Xildh.Jaamac Maxamuud wuxuu sheegay in uu sakangareeyey(ayidey) Xildhibaanadii isaga ka horeeyey, Documentiskaan hala sharciyeeyee waxaa loo baahanyahay in la soo waafajiyo Dastuurka waxayna aheyd in guddoonka iska hubiyo documentiskaan. Wuxuu soo jeediyey in loo celiyo ama guddi loo saaro oo xukuumadda hindise sharciyeed ka soo dhigto ,wuxuu soo jeediyey oo kale in la soo sharciyeeyo documentiskaan.

Xildh.Maxamed Cabdi Yuusuf,wuxuu sheegay in loo baahanyahay in la soo saxo documentiskaan xildhibaanadu way sheegey in la soo saxo ,wuxuu sheegay in dalka iyaga leeyihiin cid handadikartana aan jirin .Qod. 64-aad ee Dastuurka ayaa sheegaya wixii laga yeeli lahaa.

Xildh.C/llaahi Jaamac,(point of Order),wuxuu sheegay in waqtiga uu ka lumaayo oo dooda dib loo dhigo wixii ka maqan in la keeno.

Xildh. C/ladhiif Sanyare,wuxuu sheegay in la caddeeyo wixii ku qarsan documentiskaan in la caddeeyo oo wixii ka maqan la soo dhameystiro.waxaa loo baahanyahay in la qorsheeyo oo guddoonka soo xulaan guddi soo saxa Documentiga . Wuxuu codsadey in xildhibaanada ay qaataan wixii waana ah ,guddigiina la saaro.

Xildh.Yuusuf Axmed ,wuxuu sheegay in warqadda la soo gudbiyey uu ka horimaanayo qodobka Dastuurka ,warqadaana waa xaaraan Guddoonkana in uu qabto ma aheyn , waa in sharciga la waafajiyo.

Xildh.Khadiijo Maxamed Diiriye,waxay sheegtey in maanta ay tahay maalin qaali ah baarlamankaana uu yahay Baarlamankii 9-aad .waxay hogaan u yihiin Baarlamanka Soomaaliya khibrad iyo aqoona way leeyihiin.waadna ogtihiin wayna ku cadahay xilliga oo ah bisha September ,waxaa ka soo baxay kan xildhibaanada ay heystaan ,waxay sheegtey in ay rabaan 20-ka Augost 2016-ka ,September 10,2016-ka in la helo doorashada Madax-weynaha JFS. Waxay soo jeedisey in ay ku soo lifaaqaan xukuumadda :

- **Odayaal dahaqameedka oo ah 135-ta xubnood**
- **Maalinta Codeynta la gelaayo**
- **Maalinta Doorashada la gelaayo**
- **Maalinta Madax-weynaha la dooranaayo**

Lifaaqaa waa in la helaa Yes or No anagey na jirtaa.

4.Guddoomiyaha Baarlamanka, wuxuu sheegay in soo jeedintiisa 2-da bilood in aysan aheyn waqtiga xildhibaanada haloogu daro balse waxay aheyd gadaal gadaal u tiri ee ma aha horey horey u tiri.

Xildh.Axmed Mayow Cabdulle (Ruush),wuxuu sheegay in Baarlamanka uu 4- sano si fiican u soo shaqeeyey. Wuxuu u soo jeediyey guddoomiyaha in uu qabto wax sharciyeeysan Dastuurka dalkana lagu dhaqmo ee laga daayo siyaasadda . Waqti kororsi ma jiro xukuumadda waa inay keentaa time Lin 19 Augost 2016-ka ee ku tilmaansan doorashada dalka ka qabsoomidoonto. In xukuumadda ay keento ajende maalintii wixii la qabanlahaa.

XIldh. Goodir , wuxuu sheegay in ay isku dhex- hoos jiraan labo Documenti,mid madasha ay soo saartey **waxaana loo baahanyahay in lakala saaro tan koowaad laga doodo midda Road Map-ka ah ,kadibna midda kale laga doodo.** Hay'adaha aan la ansaxinin oo la nasaxiyo. Xildhibaanadda ka hadlaaya masiirka Ummadda Soomaaliyeed wuxuu u sheegay in 2 (Laba)Shey duulaan lagu yahay:

- **Odayaasha Xildhibaanada soo xulaaya**
- **Dastuurka KMG**

Madasha waxa ay soo saareyn : -

1.waa in lagu saxaa Dastuurka cid kale ay quseyso malaha .

2.20 Augost 2016-ka in xukuumad cusub la soo doorto,bisha Juun 20keedana xildhibaanadda in ay doorasho aadaan . wuxuu soo jeediyey in guddi loo saaro .

Xildh. Bishaar Ugaas, wuxuu sheegay in la keenay hanaanka doorashooyinka 2016-ka ,habkii waa la keenay ,waxaa loo baahanyahay Maalinta iyo Saacadda Doorashada .Doorashooyinka in maalin laga shaqeeyo iyo in la bekhaamiyo waqtiga maadaama uu soo socdo Ramadaan .

Xildh. C/llaahi Jaamac, wuxuu sheegay in muddo 9 ilaa 10 bilood ay soo fuulay culeys Soomaalida laakiin waxaa nasiib wanaag ah in Baarlamanka loo keenay oo inaga nagu soo hoobatey ,marka waxaa laga doonayaa baarlamanka in ay Maskaxdooda ay kulmiyaan .

Wuxuu soo jeedeyey 2-arrin oo kala ah :

- Mid Dastuuri ah oo lagu saleeyo qod.64-aad iyo
- Midda Sharciga
- 20 Augost 2016-ka Baarlamanka hadda jira in uu bedelo Baarlaman kale.
- In qoraalkii Xukuumadda ay soo gudbiyey laga sameeyo Hindise sharciyeed oo guddi loo saaro si howsha u qabsoonto .

Wuxuu intaa ku darey haddi sharciyadda la garab maro taariikhda wey qormeysaa ,Baarlamaanadda adduun weynaha way imanayaan.

5.Guddoomiyaha Baarlamanka ,wuxuu sheegay in ay u baahantahay mid sharci ah iyo mid Dastuurka ah.haddii uusan waafaqsaneyn Dastuurka yaa waafajinkara Xildhibaanadiina ayey hortaalaa .

20Augosto 2016-ka Baarlamankaan Baarlamankii bedelilahaa waa inuu yimaadaa wax Vaccum la yiraahdo ma jiro ,ma u saarnaa dad anaga aan u wakiilano si ay dooda noogudheeraanin.

Xildh.Cabdalla Boos Axmed, wuxuu sheegay in arrintaan ixsaasi ah ayaa manta horyaala Golaha Baarlamanka ,mana mudeysna waa wax aan ka soo fuley xukuumadda oo madashii wixii ka soo baxay ayaa naloo soo gudbiyey.

Arrinta wax xalaal ah oo ka soo fuley xukuumadda ma aha ,wuxuu dalbay in loo keeno in loo soo gudbiyo wax tifaftiran oo dadka u cuntama oo xalaal ah soona saxiixo R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Xildh. **Maxamuud Cali Dhuux,** wuxuu sheegay in Baarlamanka hadda jira waxaa loo baahanyahay uu gaarsiiyo kan hadda soo socda ,wadankana ay iyagu iska leeyihiin. Wuxuu codsadey in qodubka laga hadlaayo la sharciyeeyo oo Guddoonka iyo Xildhibaanada ay meel ugu soo jeestaan.

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa 7-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan(Jawaari),wuxuu sheegay in shirkadda xiranyahay saacaddu markey aheyd 02:04 gd.